



AMARKA AGAASIMAHA

Tixraac: Dib u Eegida Amarka Xadidaada iyo/ama Mamnuucida Isku Imaatinka Dadka Badan ee Gobolka Ohio, marka Laga Reebo

Aniga oo ah, Lance D. Himes, Agaasimaha Kumeel Gaadhka ah ee Waaxda Caafimaadka Ohio (Ohio Department of Health, ODH), oo raacaya awooda la igu siiyay R.C. 3701.13 ee " inaan soosaaro amarro gaar ah.. .si looga hortago faafitaanka xanuunka ama caabuqa" **Waxaan amrayaa** waxa soo socda si loo baajiyo faafitaanka COVID-19 ee Gobolka Ohio:

1. Dhamaan isku imaatinka dadwaynaha iyo gaarka ah ee wixii ka badan dad IO ah ee ka dhacaya banaanka guriga kaliya iyo guriyo aaga ah kuwaas oo ku wada yaal meel, ama guryo, kondhoomiiniyeem, ama qolal la deggan yahay waa mamnuuc. Sida uu ku amray Madaxweyne Trump tilmaamaha coronavirus ee uu soo saaray Maarso 16, 2020.
2. Baaragaraaf 1 ma khuseeyo munaasabadaha aroosyada iyo aasaska.
3. Si loo yareeyo faafitaanka COVID-19 oo hawada la neefsanayo gala oo ay dadku marka ay isku dhawaadeen iskugu gudbiyaan, aroosyada , aasaska iyo munaasabada kale xarumaha lagu qabanayo waxaa ka waajiba xadidaadaha soo socda:
 - a. Lama ogola isku imaatinka ama hawlaha meelaha furan ah oo jaaskana lama ogola;
 - b. Martidu waa inay fadhidaa mar kasta. Xafladaha aroska sida jaaska kowaad , furitaanka khamrida, iyo jaritaanka keega waa la ogol yahay;
 - c. Hadii la bixinayo cunto iyo cabitaan, martida waa in loogu geeyaa iyaga oo fadhiya. Lama ogola cuntada ay dadku guranayaan iyo aaga sharaabka dadku ka qaataan;
 - d. Waji gashadka waa in la xidhnaadaa mar kasta iyada oo wax la cunayo ama cabayo moojee; iyo
 - e. Lama ogola wax ka badan 10 inay miis wada fadhiistaan, oo dad isku qoys ahi waa inay wada fadhiistaan.
4. Baaragaraafka 1 ma khusayso kulamada diimaha.
5. Baaragaraafka 1 ma khusayso Wax-ka-baddalka Kowaad ee ilaalinta hadalka, oo ay kamid yihiin wareejiyayaasha cod u qaadida ama aftida iyo wixii hawlo ah iyo wixii hawl ah ee Saxaafada ah, oo ay kamid yihiin wargaysyada , telefiishinada, raadyaha, adeegyada kale ee saxaafada, iyo kulamada dawlada, oo ay ku jiraan kulamada ay waajib tahay inay u furnaadaan dadwaynaha sida uu dhigayo R.C. 1 21. 22.
6. Baaragaraafka 1 ma khuseeyo isku imaatinka kale ee lagu ogolaaday Amarada Agaasimaha Caafimaadka.
7. Miiska bilyaardiga, pinball mac hines, dart boards , juke boxes, fiidyaw geemka, geemamka arcade iyo mishiinada kale ee shilimaanta ku shaqeeya weli waa la ogol yahay inay furnaadaan iyada oo waafaqsan tilmaamaha lagu sheegey tixraaca Amarka' Wax Laga Badalay ee Agaasimaha ee Dib u Furista Maqaaxiyaha, Baararka, Adeegyada iyo Xarumaha Cuntada iyo Cabitaanka, oo waxyaalo laga reebay leh, waxaa la saxexay Juun 5, 2020.

8. Waxyaabaha laga soo reebey ee halkan lagu sheegey marka laga tago, Waxka ' Badalka Amarka Agaasimaha ee Sadexaad ee Dib u Furitaanka Maqaaxiyaha, Baararka, Adeegyada iyo Xarumaha Cuntada iyo Cabitaanka ilaa Adeegyada Wax Lagu Dhax Cuno goobta, marka laga tago ka la saxexay Sebteembar 23, 2020 wuu sii shaqayn doonaa oo aroosyada , aasaska iyo munaasabadaha kale waa ku waajib shardigani .
9. Amarkan waxa uu dhaqan galayaa 12:01 habeenio Noofembar 17, 2020.

Sidaas darteed, waxa aan halkan **ku AMRAYAA** in isku imaatinka dadwaynaha iyo gaarka ah ee ka badan 10 ruux oo ka dhacaya banaanka guriga kaliya iyo dhulka uu ku ku yaalo , ama guryo, kondhoomiineem ama qolal la deggan yahay ay mamnuuc tahay , marka laga tago qaar. Amarkan waxa uu sii jiri doonaa oo waxa uu shaqayn doonaa inta uu dhammaanayo baaqa Xaaladda Gurmadka ee Badhasaabka ' Wareegtadiisa Fulintu ka dhacayso, ama Agaasimaha Waaxda Caafimaadka uu joojinayo ama wax ka badalayo Amarkan. Ilaa heerka cidda dhaqan gelinaysa Amarkan ay ka qabto wax su'aal ah dhaqangalka Amarkan ,Agaasimaha Caafimaadka ayaa halkan ku siiyey waaxaha caafimaadka awoodda inay uga jawaabaan wixii su'aalo ah iyada oo qoraal ah oo waafaqsan Amarkan.



Lance D. Himes

Agaasimaha Kumeel Gaadhka ah ee Caafimaadka

Noofembar 15, 2020